STATE OF MAINE
GOVERNOR'S OFFICE OF POLICY INNOVATION AND THE FUTURE
181 STATE HOUSE STATION
AUGUSTA, MAINE
04333-0181

# Guddoomiyaha Gobolka Mills iyo Xeer-ilaaliyaha Guud Frey ayaa ka dalbanaya Maamulka Trump inay si buuxda u shaaciyaan faahfaahinta Xarigyada ICE ee Maine

*Warqad ay u direen Xogeeyaha Noem iyo Agaasimaha Ku-meel-gaarka ah ee ICE Lyons, Qareenka iyo Xeer-ilaaliyaha Guud waxay dalbanayaan jawaabo ku saabsan hawlgal dhawaan la xoojiyay iyo xaaladda dadka ay ICE xirtay*

**Augusta, MAINE** — Guddoomiye Janet Mills iyo Xeer-ilaaliyaha Guud Aaron Frey ayaa maanta warqad u diray Xogeeyaha Amniga Gudaha Kristi Noem iyo Agaasimaha Ku-meel-gaarka ah ee ICE Todd Lyons, iyaga oo ka dalbanaya Maamulka Trump inuu si degdeg ah u shaaciyo dhammaan macluumaadka ku saabsan qof kasta oo la xiray intii lagu jiray hawlgalkii "la xoojiyay" ee dhawaan ay ICE ka fulisay Maine, isla markaana cambaareynaya mas'uuliyiinta federaalka ee fuliyay xarigyo qarsoodi ah oo kala fogeeyay qoysas isla markaana cabsi geliyay bulshooyinka guud ahaan gobolka.

War-saxaafadeed shalay la soo saaray, ICE waxay sheegtay inay xirtay 206 qof oo ku sugan Maine, laakiin hay'adda ayaa si guud u shaacisay macluumaad kooban oo kaliya oo ku saabsan 10 ka mid ah dadkaas.

Wararka cusub ayaa tilmaamaya in qaar ka mid ah dadka la xiray ay u muuqdaan inay halkan ku joogeen si sharci ah oo aan wax dembi ah gelin, taasoo si toos ah uga hor imanaysa sheegashada Maamulka Trump ee ahayd in la raadinayo 'kuwa ugu xun oo xun.' Tallaabooyinka ICE waxay kala fogeeyeen waalidiinta iyo carruurta yaryar waxayna ka tageen qoysaska iyagoo wajahaya ka ceyrin guri, xasilooni la'aan maaliyadeed, iyo cabsi — iyagoo aan haysan caddeyn ku saabsan halka lagu haayo eheladooda.

Guddoomiyaha iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa dalbaday in Dowladda Federaalka ay bixiso aqoonsiga qof kasta oo la xiray, sababta sharciga ee xiritaanka, goobta hadda ee qof kasta uu ku xiran yahay, iyo qorshayaasha Dowladda Federaalka ee shakhsi kasta.

"Waxaa jira dad ku kala nool gobolkeena maanta oo aan ogeyn meesha ay ku sugan yihiin eheladooda sababtana ay tahay idinka dartiina," **Guddoomiye Mills iyo Xeer-ilaaliyaha Guud Frey ayaa qoray**. "Taasi waa wax aan la aqbali karin, mana aha oo kaliya xadgudub ku saabsan xuquuqda Dastuuriga ah ee ay leeyihiin, balse sidoo kale waxay hanjabaad ku tahay xuquuqda Dastuuriga ah ee dhammaanteen nalagu damaanad qaaday. Dadweynaha Maine waxay mudanyihiin jawaabo, waxayna mudanyihiin isla xisaabtan."

"Maraykanka, ma lihin booliis qarsoodi ah. Maraykanka, ma sameyno xiritaanno qarsoodi ah," **Guddoomiyaha iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa sii watay**. "Haddii aad haysataan amarada soo xeritaanka, markaas tusiya. Dadweynaha Maine waxay xaq u leeyihiin macluumaadkan aasaasiga ah."

Guddoomiye Mills iyo Xeer-ilaaliyaha Guud Frey waxay sidoo kale dalbadeen in Waaxda Amniga Gudaha ay shaaciso tirada wakiilada Federaalka ee la geeyey Maine inta lagu jiray

howlgalkan iyo in la aqoonsado saraakiisha kormeereysa ee mas'uulka ka ah hawlgallada fulinta iyo darajooyinkooda ciidan.

"Marka la joogo Maine, waxaan ognahay sida uu u ekaado fulinta sharciga oo wanaagsan," **Guddoomiye Mills iyo Xeer-ilaaliyaha Guud Frey ayaa qoreen**. "Saraakiisheena si weyn ayaa loo tababaray waxaana lagu xisaabtamaa heerar sare oo waxqabad iyo isla xisaabtan ah. Waxay ka shaqeeyaan inay dhisaan kalsooni bulshooyinka ay u adeegaan — ma aha inay abuuraan cabsi, caga jugleyn, ama kala qaybin, sida wakiiladiinnu sameeyeen."

Qoraalka buuxa ee warqadda waa sida soo socota:

Xoghaaye Noem iyo Agaasimaha Ku-meel-gaarka ah Lyons:

Sida ku xusan war-saxaafadeedka Waaxda Socdaalka iyo Dhaqangelinta Canshuuraha ee Maraykanka (U.S. Immigration and Customs Enforcement, ICE) ee Janaayo 29ka, ICE ayaa xirtay 206 qof inta lagu guda jiray howlgalkii 'xoojinta' ee Maine.

ICE waxay bixisay macluumaad dadweyne oo xaddidan oo ku saabsan kaliya 10 ka mid ah dadkaas. Si kastaba ha ahaatee, warbixinno ka imanaya warbaahinta iyo illo kale ayaa muujinaya in ICE ay xirtay laba sarkaal oo ka tirsan laamaha ammaanka, kalkaalinta caafimaad, iyo injineer rayid ah, iyo kuwo kale oo badan, isla markaana si arxan-darro iyo naxariis-la'aan ah uga kala qaaday carruur yaryar iyo waalidkood. Qaar badan oo ka mid ah dadkaas waxay u muuqdaan inay si sharci ah halkan u joogeen isla markaana aanay wax dembi ah gelin – taas oo ka hor imaanaysa sheegashadiinna ah in Maamulka Trump uu beegsanayo oo keliya "kuwa ugu xun oo xun."

Dhab ahaantii, halkii dadkaas lagu tilmaami lahaa kuwa ugu xun oo xun, annagu waxaan ku tilmaami lahayn xeeladaha arxan-darrada ah ee hay'addiinna inay yihiin kuwa ugu xun oo xun. Gudaha Maine, waxaan garanaynaa sida ay u egyihiin hay'adaha sharci-fulinta ee wanaagsan. Saraakiisheenna si ballaaran ayaa loo tababaray, waxaana lagu hayaa heerar sare oo waxqabad iyo isla-xisaabtan ah. Waxay ka shaqeeyaan dhisidda kalsoonida bulshooyinka ay u adeegaan – ma aha inay abuuraan cabsi, caga jugleyn, iyo kala-qaybin, sida wakiilladiinnu sameeyeen.

Soo afjarida la sheegay ee hawlgalkii la xoojiyay ee Maine ma soo afjaraayo xanuunka iyo dhibaatada ay wakiilladiinnu u geysteen bulshooyinka ku nool gobolkeenna -- dad la argagax geliyay iyo ganacsiyo loo hanjabay, dhammaantoodna ay sameysay dawladooda.

Maanta guud ahaan gobolkeenna waxaa jira dad aan garanayn halka ay ku sugan yihiin ehelkoodii idinka dartiin. Taasi waa mid aan la aqbali karin, mana aha oo keliya ku xadgudub xuquuqdooda dastuuriga ah, balse sidoo kale waxay hanjabaad ku tahay xuquuqda Dastuuriga ah ee dhammaanteen nalagu damaanad qaaday. Dadka reer Maine waxay u qalmaan jawaabo, waxayna u qalmaan isla-xisaabtan. Sidaa darteed, waxaan dalbanaynaa xogtan soo socota:

1. Tirada wakiillada federaalka ah ee loo diray Maine hawlgalkii la xoojiyay, iyo magacyada iyo darajooyinka saraakiisha kormeerka ka mas'uulka ahaa.

2. Aqoonsiyada dhammaan dadka ay ICE xirtay intii ay hawlgalkooda ka wadeen Maine.

3. Ku saleynta sharciga ee xarig kasta oo ay ICE fulisay intii ay hawlgalkooda ka wadeen Maine.

4. Goobta hadda ay ku sugan yihiin dhammaan dadka ay ICE xirtay intii ay hawlgalkooda ka wadeen Maine.

5. Qorshayaasha ay dowladda Federaalka u dejisay qof kasta oo ay ICE xirtay intii ay hawlgalkooda ka wadeen Maine.

Mareykanka gudahiisa, ma haysano boolis qarsoon. Mareykanka gudahiisa, ma sameyno xarigyo qarsoodi ah. Sida aan horay u sheegnay, haddii aad haysataan amarro maxkamadeed, markaa tusiya. Dadka Maine waxay xaq u leeyihiin macluumaadkan aasaasiga ah. Maine lama cabsi gelin doono. Waxaan dalbaneynaa jawaabo.

Si daacadnimo leh,

Janet T. Mills

Guddoomiyaha

Aaron M. Frey

Xeer Ilaaliyah Guud

*Translation supported by the Governor's Office of Policy Innovation and the Future*